

SHURUUDAHAN IYO XEERARKAN WAXAY QAYB KA YIHIIN WAAXDA GAADIIDKA GOBALKA WASHINGTON (WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF TRANSPORTATION, WSDOT) ee Kaarka Good To Go! HESHIISKA MACMIILKA (HESHIISKA). MA JIRTO WAX KU QORAN HESHIISKA OO KAA DHAAFAYA, MACMIIL AHAAN, GANAAXYADA KA DHASHA U HOGAANSANAAN LAAANTA SHARCIYADA IYO XEERARKA GOBALKA.

### Nooca 11

Marka aad furato koontada Good To Go!, waxaad aqbalaysaa inaad raacayso shuruudaha iyo xeerarka soo socda:

#### 1.0 Kharashaadka iyo Lacagaha lagu bixiyo khidmada wado marka baabuurta

##### 1.1 Isticmaalada Koontada

Koontadaada Good To Go! waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo khidmada wado marka baabuurta ayadoo la adeegsanaayo midkood kaarka Good To Go! ama Lacag bixinta Taarikada La adeegsado.

##### 1.2 Kharashaadka

Kharashaadka khidmada wado marka baabuurta way kala duwanaan karaan ayadoo ku xiran habka lacagta loo bixinaayo iyo mid iyo in kasii badan oo kamid ah arrimahaan soo socda:

- 1) Tirada candhada gaariga ee mashiinku sheego;
- 2) Wakhtiga iyo taariikhda gaarigu soconaa;
- 3) Goobta lagu bixinayo khidmada wada marka gaariga
- 4) In gaarigu yahay gaari la wada raaci karo ama inuusan ahayn iyo/ama;
- 5) In gaarigu leeyahay kaarka jid marka ee Good To Go! oo si ficnan loo rakibay.

##### 1.3 Ku filnaanshi la'aanta lacagta koontada ku jirta

Haddii lacagta ka jirta koontada ka hoos maro ebar gaarigana loo soo saaro kharashka boonada ee Pay By Mail, kharashka waxaa lagu dari doonaa bayaanada kharashka ee bilaha ah, oo loo diri doono ciwaanka deegaanka qofka leh koontada Good To Go! ee diiwaanka ku jirta. Haddii kharashaadka boonada an la bixin, Ogeysiis Ganaax oo Madani ah ayaa loo diri doonaa qofka gaariga ku diiwaangashan inuu leeyahay. Waxaa lagu ganaaxi karaa kharashaad dheeraad ah iyo ayadoo lagu saleynayo shuruudahaan soo socda:

- 1) Haddii aad doorato dookha lacag bixinta Horey kasii Bixinta Lacagta (Pre-paid) si aad lacag ugu shubto koontadaada Good To Go! aysana kuugu jirin lacag ku filan inaad iskaga bixiso kharashka boonada, waxaad bixin doontaa kharash lagu saleynaayo qiimaha Pay By Mail.
- 2) Haddii aad isticmaasho dookha Bixi Markaad marayso (Pay As You Go) aadna lacagta ku bixin wayso habka lacag bixinta ee ad dooratay, waxaad bixin doontaa kharash lagu saleynaayo qiimaha Ku bixi Pay By Mail. Fadlan si joogto ah u akhri bayaynada kharashkaaga ee bilaha ah iyo macluumaadka koontadaadi aad iskaga ilaalisoo kharashaad dheeraad ama ganaaxyo.

#### 2.0 Macluumaadka Koontada

##### 2.1 Koontada Wax walba u saxan yihiin

Si wax walba u saxdo koontadaada, waa in:

- 1) Joogtee in koontadaada ku jirto lacag fiican haddii habka lacag bixinta koonto uu yahay nidaam lacag bixinta hordhaca ah;
- 2) Mar walba diyaar u ahoow lacag bixinta;
- 3) Macluumaadka meelaha lagaala soo xariiraayo, ciwaanka boostada, iimaylka, taleefoon lambarka waa inay yihiin kuwii kugu dambeeyay ayna yihiin kuwa ku qoran koontada Good To Go! iyo Waaxda Ruqsad Bixinta, maadaama Good To Go! yahay adeega ka duwan Department of Licensing;
- 4) Macluumaadka gaarigaaga oo ay kujiraan sanadka, shirkada sameysay, nooca uu yahay, lambarka taarikada, lambarka boonada ay yihiin kuwii ugu danbeeyay, iyo;
- 5) Si joogto ah u akhrido baynka kharashka ee koonto iyo macluumaadka koontada aad u hubiso in wax kasta ay yihiin sidii loogu talagalay.

##### 2.2 Xiritaanka

Waxaad codsan kartaa in koontadaada la xiro. Marka aad bixiso dhammaan kharashaadka gaariga ee kugu harsanaa, iyo/ama ganaaxyada madaniga ah, lacag kasta oo koontada ku hartay dib ayaa laguugu soo celin doonaa.

##### 2.3 Lacag celinada

Lacagaha la celinayo waxaa dib loogu celin doonaa habkii markii hore lagu bixiyay marka ay maqquul tahay, waxaa la fulinayaa 30 maalmood gudahood kadib marka la codsado. Koontooyinka aan diiwaangashanayn uma qalmaan in lacag dib loogu celiyo.

#### 3.0 Ikhtiyaarada Lacag Bixinta

##### 3.1 Ikhtiyaarada Lacag bixinta ee Otamaatiga ah

Waxaa jira labo dookh oo ay heli karaan macaamiisha doonaaya inay lacag boonadooda ku bixiyaan qaab ootamaatiga ah:

###### 1) Lacag Bixinta Hore

Lacag bixinta hordhaca ah waxaa laga doonayaa inaad geliso lacag dhan ugu yaran \$30 koontadaada si loogu daboolo kharashaadka boonooyinka iyo kharash kasta oo ka dhasha boono aad rabto inaad mustaqbalka iibsato. Marka lacagta ku jirta koontadaada ay yaraato, koontadaada waxaa soo geli doonaa lacag ootamaatig ah oo ka imaanays habka lacag bixinta ee aad daaratay. Ama waxaad dooran kartaa maalmo gaar ah oo bisha ka mid ah inaad dib u buuxiso lacagta ku jirta koontadaada adoo adeegsanaaya jeega elektarooniga ah. Fadlan xaqiiji inaad doorato lacag ku filan oo aad ku dabooli karto kharashka boonada aad adeegsan doonto wakhtiyada u dhaxeeya mararka aad koonto lacagta ku shubto si aad iskaga ilaalisoo in lagu soo diro boosto lagaaga dalbaanaayo inaad kharashka ku bixiso. Haddii aad u baahan

tahay qaab toos ah ayaad koontadaada lacag ugu shubi kartaa inta u dhaxeeya taariikhda aad lacagta ku shubto.

###### 2) Bixi Lacagta Marka aad Baxeyso

Lagaama doonaa haraadiga lacag bixinta hordhaca ah. Kadib marka aad gaarigaaga kaxeysato, kharashka boonada gaariga waxaa si ootamaatiga ah looga jaran doona kaarkaaga kaashka labo jeer bishii. Fadlan xaqiiji in habka aad lacagta ku bixiso inaysan waxba k qaldaneyn si aad iskaga ilaalisoo in lagu soo diro codsi kharash bixin oo lagu bixinayo boostada.

##### 3.2 Lacag ku Shubashada Koontada

Lacagta ugu yar ee lagaa doonaa inay koontada kujirto wa \$30 si lacag ootamaatiga ah usoo gasho koonto. Ayadoo ku xiran isticmaalkaaga boonada, waxaad dooran kartaa in lacag badan ay soo gasho koontadaada kuna soo gelaya qaab ootamaatig ah. Haddii aad diyaarisoo lacag bixinta otamaatiga ah, waxaad aqbashay arrimahan soo socda:

###### 1) Nooca lacag bixinta

Waxaad bixin doontaa oggolaansho iyo macluumaadka lagama maarmaanka ah si aad u diyaarisoo lacag bixin ootamaatig ah oo ayadoo la adeegsanaayo kaarka kaashka, kaarka deynta, ama jeega elektarooniga ah (Automated Clearing House, ACH).

###### 2) Lacag bixinta Waa la diiday

Haddii baankaagu diido lacag bixintaada, koontadaadawaxaa laga yabaa in laga dhigo akoon lacagta loogu shubi karo qaab toos ah. Waxaad macluumaadkaaga lacag bixinta ka cusbooneysiin kartaa onlaynka si aad dib mar labaad ugu diyaarisoo lacag bixinta ootamaatiga ah.

###### 3) Lacag Bixinta Nidaamka Lacag Celinta

Haddii xarunta adeegga macmiilka ay hesho ogaysiis xad-dhaaf ah oo ku saabsan khilaaf ka jira kaarka kaashka ama khilaafka jeega elektarooniga ah (ACH) ee keena dib usoo celint lacagta (dib ugu celinta lacagta kaarka) ama lacag bixinada su'aashu ka taagan tahay, qofka koontada leh waxaa laga yaabaa in looga baahdo inuu ka buuxiyo koontadiisa lacag la xaqiijiyay ama lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka. Haddi aad su'aal ka keento lacagaha lagu bixiyo habkaaga lacag bixinta, adiga ayaa wali ka masuul ah inaad bixiso kharashka boonooyinka. Qaab kaliya ee su'aal looga keeni karo kharashka boonooyinka waa in loo maro nidaamka khilaafka ee Good To Go! ee lagu qeexay qaybta 4.0.

###### 4) Lacag aan Ku filneyn (Non-sufficient Funds, NSF)

Haddii baanku soo celiyo jeega maadm koontada ay kujirto lacag yar, kharashka aan kugu filnayn (non-sufficient funds, NSF) oo ah \$30 ayaa lagu dalaci doonaa akoonka. Qofka koonto iska leh waxa looga baahan karaa inuu koonto ku shubo lacag la xaqiijiyay am lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka.

##### 3.3 Lacag Ku shubida Koonto ee Tooska ah

Haddii aad diyaarisoo lacag bixinta tooska ah, waxaad aqbashay arrimahaan soo socda:

###### 1) Nooca Lacag bixinta

Waxaad isticmaali kartaa kaarka kaashka ama kaarka deynta, jeega elektarooniga ah (ACH), jeeg, dalab lacag, ama lacag cadaan ah. Fadlan lacag haku soo dirin boosto. Xarunta adeegga macmiilka waxay xaq u leedahay inay diido jeegaga kumeel gaarka ah.

###### 2) Lacag Bixinta Nidaamka Lacag Celinta

Haddii xarunta adeegga macmiilka ay hesho ogaysiis xad-dhaaf ah oo ku saabsan khilaaf ka jira kaarka kaashka ama khilaafka jeega elektarooniga ah (ACH) ee keena dib usoo celint lacagta (dib ugu celinta lacagta kaarka) ama lacag bixinada su'aashu ka taagan tahay, qofka koontada leh waxaa laga yaabaa in looga baahdo inuu ka buuxiyo koontadiisa lacag la xaqiijiyay ama lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka. Haddi aad su'aal ka keento lacagaha lagu bixiyo habkaaga lacag bixinta, adiga ayaa wali ka masuul ah inaad bixiso kharashka boonooyinka. Qaab kaliya ee su'aal looga keeni karo kharashka boonooyinka waa in loo maro nidaamka khilaafka ee Good To Go! ee lagu qeexay qaybta 4.0.

###### 3) Lacag aan Ku filneyn (Non-sufficient Funds, NSF)

Haddii baanku soo celiyo jeega maadm koontada ay kujirto lacag yar, kharashka aan kugu filnayn (non-sufficient funds, NSF) oo ah \$30 ayaa lagu dalaci doonaa akoonka. Qofka koonto iska leh waxa looga baahan karaa inuu koonto ku shubo lacag la xaqiijiyay am lacag cadaan ah si uu u adeegsado mustaqbalka.

#### 4.0 Khilaafka

Waxaad su'aal ka keeni kartaa kharashaadka iyo lacaga boonooyinka ee laga jartay koontadaada onlaynka barta [www.MyGoodToGo.com](http://www.MyGoodToGo.com) ama kadib marka lala xariiray xarunta adeega macmiisha ee Good To Go! muddo 60 maalmood ah kadib taariikhda iibka. Haddii lacagta boonada ama kharashka meesha laga saaray ama wax laga badalay, koontadaadaayaa lacag lagu shubayaa.

## 5.0 Isticmaalka Kaarka Wado Marka Good To Go!

Waxaad isticmaali kartaa boonadaada gaariga ee shaqayneysa **Good To Go!** mar kasta aad timaado xarunta boonada **Good To Go!**.

### 5.1 Rakibitaanka

Waxaad aqbashay in si sax ah loo rakibo, loo dhejiso, looga shaqeysiiyo iyo in si sax loo isticmaalo boonada sida ku xusan tilmaamaha. Marka la rakibo baaska gaariga, waa inaan marna la fujin si uu usii wado in qaab fican u shaqeeyo.

### 5.2 Risiityada

Waad fahantay oo ogolaatay inaad heli doonin risiityada boonada ee shakhsiyaadka laakiin laga yaabo inaad aragto macluumaadka kharashaadka aad bixisay marka aad gasho koontadaada barta [www.MyGoodToGo.com](http://www.MyGoodToGo.com).

### 5.3 Badalitaanka

Haddii aad u baahan tahay inaad badasho kaarkaaga sabab kastaba ha jirtee, waxaad masuul ka noqon doontaa lacagta badelka. Haddii xarunta adeegga macmiilka ay ogto in kaarkaagu leeyhaay cilad, kaarka waxaa lagu badeli karaa qaab bilaash sadex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la iibsaday. Haddii kaarkaagu kaa lumo ama lagaa xado, waa inaad isla markiiba ogeysiisaa xarunta adeegga macmiilka maadaama aad masuul ka noqonayso dhamaan kharashyada la galo marka ogeysiiska la helo.

### 5.4 Boonada ay ku gudbaan Mootooyinka

Boonada mootada waa in loo adeegsado mootada kaliya. Rakibid iyo isticmaalka boonada mootada ee loo adeegsado baabuur aan ahayn mooto waxaa ka dhalan doona in la joojiyo shaqada boonda iyo/ama ganaa lacag bixinta ah sida lagu qeexay Revised Code of Washington (RCW) 46.61.690.

## 6.0 Boonada Dib loogu Noqdo

### 6.1 Boonooyinka Laga Iibsado Good To Go!

Kaararka sida tooska ah looga iibsaday **Good To Go!** ee buuxiya shuruudahaan soo socda waxaa lagu soo celin karaa kaarka kaashka lixdan billood gudahood oo laga bilaabaayo taariikhda iibka:

- 1) Kaarka waa in lasoo celiyo asagoo cusub, la isticmaal, ahna xaalad lagu iibin karo
- 2) Kaarka waa inaan lagu isticmaal xarunta kaararka.
- 3) Flex Passes waa in lagu soo celiyaa xidhmoyin laba quful ah asagoo kujira, iyo baakad haddii mid la bixiyay.
- 4) Kaararka taarikada shatiga waa in lagu soo celiyaa bokiskoodii asalka ahaa, iyo qalab kasta oo lagu rakibo oo la bixiyay.

### 6.2 Boonooyinka laga iibsaday Dukaamada Tafaariikhleyda ah

Kaararka sida tooska ah looga iibsado dukaan laguma soo celin karo **Good To Go!** marka la adeegsado kaarka kaashka waana in lagu celiyaa dukaamada tafaariikhleyda sida ku xusan siyaasada dib usoo celinta. Haddii kaarka lagu gudbo xiran yahay, macmiilku waa inuu la xariiro **Good To Go!**.

## 7.0 Qiimo dhimisayd iyo Dhaaftaanada

Si aad u hesho qiimo dhimis ama dhaaftaanada xarumaha lagu bixiyo kharashka boonad, koontadaada waa inuu yahay mid wax walba u saxan yihiin waana inaad buuxisaa shuruudaha sida uu qabo Washington State Transportation Commission. Waa inaad sidoo kale ku rakibtaa boonada loo qoondeeyay qiimo dhimista ama dhaaftaanka kharashka (tusaale ahaan waa inaad haysataa Boonada Flex si aad u hesho dhaaftaank kharashka baabuuraya). Xeerarka ka dhaaftaanka hadda waxaa laga heli karaa barta [www.MyGoodToGo.com/EN/learn/toll-roads/carpools](http://www.MyGoodToGo.com/EN/learn/toll-roads/carpools).

## 8.0 Lacag bixinta La adeegsado Taarikada

Haddii aanad haysan boono, ama haddii boonadaadu uusan mashiinku sheegin, nidaamkeena lacag bixinta sawirku waxa uu qaadi doonaa sawirada taarikada gaarigaaga. Haddii lambarka taarikada uu ku qoran yahay koontadaada, kharashka waxa lagu jaran doonaa nidaamka lacag bixinta ee la adeegsado taarikada ayadoo kharashka ugu habboon laga jaraayo koontadaada. Lacag bixinta fudud ee la adeegsado taarikaga gariga ee ah 25 senti waxaa lagu qiimayn doonaa kharashaadka boonada lacag bixinta taarikada.

## 9.0 Joojinta

Heshiiskan waxaa la joojin karaa waqti kasta iyo sabab kasta ha jirtee. Sidoo kale, Haddii koontadaadasidaas loo joojiyo, xarunta adeegga macmiilka waxay soo celin doontaa lacag kasta oo kujira koontadaadaka dib marka la bixiyo kharashyada boonooyinka, kharashaadka, iyo kharashka iyadoo aan wadan wax lacag dulsaar ah. Wax lacag ah dib looguma celin doono akoonada aan diiwaanahayn.

## 10.0 Siyaasada Asturnaanta

### 10.1 Isbadelada

Siyaasada Asturnaanta ee **Good To Go!** ee laga helo [www.MyGoodToGo.com](http://www.MyGoodToGo.com), waxay ku xiran tahay shuruudaha sharciga gobolka iyo midka dawlada dhexe waxaana laga yaabaa in wax laga badalo wakhti kasta iyadoo la raacaayo shuruudaha sharciga ee khuseeya.

### 10.2 Shaacinta Macluumaadka

Macluumaadka ay soo aruuriso xarunta adeegga macmiish ee la xiriirta koontadaada lama shaacin doono marka laga reebo xaaladaha soo socda:

- 1) Marka aad codsato sida qof leh koontadaada leh aqoonsi habboon.
- 2) Marka ay lagama maarmaanka yihiin si loogu adeegsado uruurinta lacagaha boonada ee aan la bixin, kharashaadka iyo ganaaxyada.
- 3) Marka uu sidoo kale sharcigu codsado.

## 11.0 Kharashaadka Maamulka

Kharashaadka maamulka waxaa lagu saleyn karaa xaaladaha soo socda:

### 11.1 Bayaanada Koonto ee Bilaha ah

Nuqulo waraago ah oo bayaanakaaga bilaha ah ayaa laguugu soo diri karaa boostada. Waxaa jira lacag lagaaga qaadayo daabacaada iyo boostada oo ah 50 senti boggiiba (kharashka ugu yar ee boggiiba la qaadi karo waa \$1.50). Bayaanada bilaha ah sidoo kale waxaa lagu heli karaa oonleenka ama iimayl ayadoon wax lacag ah lagaaga qaadeyn.

### 11.2 Kharashkaadka Dib u Daabacaada Bayaanka koonto

Bayaanada baanka ee warqadaha ah waxaa laga heli karaa sidoo kale xarumaha adeegga macmiilka ee **Good To Go!**. Waxaa jira lacag lagaaga qadaayo dib u daabacida oo ah 50 senti boggiiba (kharashka ugu yar boggiiba lagaaga qaadaayo waa \$1.50).

### 11.3 Lacag bixinta La adeegsado Taarikada

Kharashka lacag bixint la adeegsado taarikada ee 25 senti waxa lagu qiimayn doonaa kharashaadka Pay By Plate waxaana laga jari doonaa koonto **Good To Go!**.

### 11.4 Kharashka Ka dhasha Dib ka bixinta Khidmada

Kharash dhan \$5 oo la iskaga qaado daahitaanka ayaa lagu dabaqi doonaa lacag bixin ksta haddii bixinta kharashka boonada aan la bixin marka la gaaro waqtigeed.

### 11.5 Kharashka Ganaaxa Madaniga ah

Kharash kasta oo lagu bixiyo boonada oo aan lagu bixin 80 maalmood gudahooda oo laga bilaabo taariikhda bixinta kharashka boonada waxa uu noqonayaa mid u qalma in lagu ganaaxo kharashka ganaxa madaniga h. Kharashka ganaaxa madaniga ah waa \$40 halkii kharash bixinb.

### 11.6 Khidmada Xiritaanka Koonto

Haddii akoonkaagu xiran yahay 21 billood oo isku xigta, waxaa laga yaabaa koontadaada in la xiro. Khidmada shaqeyn la'aanta koonto la iskaga qaado ee ah \$5 ayaa laga yaabaa in lagu dalaco lacag kasta oo koonto kujirtana kadib marka la xiro dib ayaa loo bixin doonaa ayadoon wax dulsaar ah wadan.

### 11.7 Waa ay Isbadeli karaan

Khidmaduhu waa ay isbadeli karaan. Khidmadaha hadda waxaa lasoo gelin doonaa bayaanaka koontadaada iyo barta [www.MyGoodToGo.com](http://www.MyGoodToGo.com).

## 12.0 Isbadelada

Xarunta adeegga macmiilka waxa laga yaabaa inay hadba waqti kadib sameyso isbadelo ama inay wax ka badesho shuruudaha iyo xeerarka heshiiska.

## 13.0 Masuuliyada Maaliyadeed

Midkoodna WSDOT iyo xarunta adeegga macmiilka kuma lahan wax masuuliyad ah ama waajibaad ah macmiilka marka la eego isticmaalka ama waxqabadka kaarka ama koontada **Good To Go!**.

## 14.0 Turjumaada

Wixii caawimaad luuqadaha kala duwan ah ee aad u bahantaheya ka wac lambarka 1-866-936-8246 oo u codso turjuman si lacag la'an ah.

Dhukumiintiyada la turjumay waxaa laga helaa barta oonleenka ah [www.wsdot.wa.gov/travel/roads-bridges/toll-roads-bridges-tunnels/good-go-accounts-passes#TranslatedDocs](http://www.wsdot.wa.gov/travel/roads-bridges/toll-roads-bridges-tunnels/good-go-accounts-passes#TranslatedDocs) kadib marka la codsadi. Si aad u codsato turjumaada dukumiinti

gaar ah waxaad la xariirtaa adeegga macmiilka oo lambarkoodu yahay 1-866-936-8246.

## 15.0 Koontooyinka Aan la Diiwaangelin

Macluumaadka shakhsi ahaaneed lama heli karo. Hase yeeshee haddii aad jecleen lahayd inaad koontada oonleen ku isticmaasho, ama inaad bayaanaka baanka ee bilaha ah ama xogaha kale ee koontada aad lacag la'aan ah hesho, ciwaan iimayl ayaa loo baahan yahay.

Macaamiishu waxay furan karaan koonto aan diiwaangashanayn iyagoo codsi onlayn ah ku soo gudbinaya ama soo diraya foom codsi ah. Macmiilku waa inuu bixiyo khidma hordhaca ah oo ah \$30 si loogu furo koonto.

Kaarka **Good To Go!** waa in lagu diiwaangeliyo gaari kasta oo loo diiwaangeliyay koontoaan diiwaangashayn.

Macmiilku ma heli karo lacag celinta koonto aan diiwaan gashanayn, xataa haddii akoonku lacag ku jirto marka la xiraayo.

Haddii koontada aan la diiwaangelin aysan kujirn lacag ku xiran oo lagu bixin karo lacagta boonada lacagta haraadiga ah ee koontada waxay noqon doontaa mid ebar ka yar.

Mulkiilaha gaadiidka ee ka diiwaan gashan Department of Licensing ayaa ku heli doona kharashka kaarka boosto kharashaadka safarada mustaqbalka.

Macaamiisha leh koontooyinka aan diiwaangashanayn kama qayb qaadani karaan barnaamijka dhaaftaanka ganaaxa halka mar ah ilaa koontada loo rogo heerka koonto **Good To Go!**.

Ogeysiiska Title VI ee Dadwaynaha: Waa xeerarka siyaasada Washington State Department of Transportation (WSDOT) si ay u xaqiijiso inaan qofna, iyadoo loo eegayo isirka, midabka, wadanka u dhalashada, sida ku xusan Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 (Civil Rights Act of 1964), laga saarayo ka qaybgalka, loo diido dheefaha, ama si kale loogu takooro mid kamid ah barnaamijyadeeda iyo hawlaha. Qof kasta oo aaminsan in lagu xadgudbay ilaalinta xuquuqdiisa/eeda Title VI, wuxuu u cabasho ka xaraysan karaa Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah (Office of Equity and Civil Rights, OECR) ee WSDOT. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamka cabashada Title VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibaadyadayada ka hortaga takoorka, fadlan kala xiriir Iskuduwaha Title VI ee OECR (360) 705-7090.

Macluumaadka Xeerka Dadka Naafada ee Maraykanka u Dhashay (Americans with Disabilities Act, ADA): Agabkan waxaa lagu heli karaa hab ka duwan adiga oo iimayl ugu soo diraya Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah [wsdotada@wsdot.wa.gov](mailto:wsdotada@wsdot.wa.gov) ama adoo wacaya khadka bilaashka ah, 855-362-4ADA(4232). Dadka dhegaha la' ama maqalkoodu ku adag yahay waxay samayn karaan codsi iyagoo ka wacaya Gudbinta Gobolka Washington 711.